Kidsafe Western Australia
CHILD ACCIDENT PREVENTION FOUNDATION OF AUSTRALIA
fact sheet

Kursiga Gaariga ee Ilmaha

Tirakoob: dhaawaca qofka gaariga saaran

Western Australia gudaheeda, sababta ugu weyn oo dhimashada iyo sababta saddexaad ee ilma isbitaal loo dhigo 0-14 waxay ka timaadaa shil gaari.
Isku celcelis siddeed ilmood (oo ka yar 16 sanadood) ayaa dhiman doona sanad walba, waxaana isbitaal la dhigi doonaa 117 qiyaas ahaan 140 ayaana la keeni doonaa Isbitaalka Margaret Princess sababa la xiriira rakaab shil ku galay gaari.

Noocyada dhaawaca

Dhaawac iska sahlan iyo jug ayuu ahaa dhaawaca ugu badani. Carruurta aan kursiga lagu xirin ayaa ahaa kuwa ugu badan oo uu soo gaaro dhaawac madaxa ka gaaray marka la dhinac dhigo kuwa xirnaa.

Sharciga WA

Qaanuunka WA wuxuu uga baahan yahay dareewalada inay xaqiijiyaan dhamaan carruurta ka yar 16 sanadood oo ku safraya gaari in kursiga la ogol yahay lagu xiro ama suunka.

Carruurta ka yar hal sano waxaa waajiba in lagu xiro mid leh mustawaha Australia AS: 1754 ee ilmaha lagu xiro, oo ku haboon ilmaha baaxadiisa iyo miisaankiisa markuu gaari ku safrayo.

Kursiga ilmaha waxaa lagu asteeyey baaq la ansixiyey (code AS: 1754) waana in si sax ah loogu xiraa gaariga iyagoo la isticmaalayo mustawaha Australia ee ku qoofalida.

Kursiga ilmaha waa in si haboon loogu xiraa looguna rakibaa ilmaha adeegsanaya mar walba.

Haddii aan kursiga ilmaha si sax loogu rakibin dareewalka waxaa la ganaaxi karaa ilaa $500 wuxuuna lumin karaa ilaa 4 dhibcood ilmihiiba! (Abril 2007)

Ka dhaafid

Taksiyada iyo kuwa la kiraysto waa laga dhaafay ilma ku xirida. Taas macneheedu maaha waxaad tahay amaan.

Mustawayaasha AUSTRALIA – AS/NZS 1754

Certified Product
Australian Standard
AS/NZS 1754
Lic
Standards Australia

Dhamaan kuraasta carruurtu ee Australia lagu gadaa waa inay buuxisaa shuruudaha adag ee AS: 1754 oo khuseeya qalabka, naqshada, dhismaha, waxtarka, tijaabinta iyo astaamaynta kursiga ilmaha.

Kuraasta wadamada kale laga soo gaday waa inay buuxiyaan shuruuda mustawaha Australia – waana sharci daro inaad u isticmaasho Australia gudaheeda.

Astaanta hoose ayaa si buuxda u muujinaysa mustawaha shuruudaha.

Meeshay jawaabka tahay in Carruuri fuusho Ilmahaygu ma fariisan karaa kursiga hore ee rakaabka?

Cilmi baaris ayaa si waadax ah u muujisay in dadka ku safraya kursiga hore ee gaariga uu ku jiro khatar siyaada ah oo dhaawac iyo/ama dhimasho haddii shil dhaco.

Carruurtu waxay fariisan karaan kursiga hore haddii si sax ah loogu xiro gaariga.

Kidsafe kuma talinayso in carruurta ka yar 10-12 fadhiisato kursiga hore.

Amaanka Kursiga Dhexe

Kidsafe WA iyo khubarada kale ee amaanka waxay soo jeedinayaan in carruurtu ku safarto kursiga dambe oo dhexda ku yaalla ahna xalka ugu fiican. Booskaani wuxuu bixiyaa amaan dhinac walba ah. Waxaa laga yaabaa in kursiga ilmaha aan la dhigi karin bartamaha kursiga dhexe sababtoo ah:

- Kursiga dambe waa isku laabmaa 50/50
- Kursigu wuxuu leeyahay meel dhexe oo soo kacsan
- Kursiga dareewalku wuxuu gadaal ugu tiirsan yahay kursiga ilmaha.

Xaalladaha noocaan ah, rakaabka gadaal oo bidixda ah ayaa ah qofka ugu haboon dhinaca maadaama dhinacaasi yahay kan banaanka/ wadada xiga.

Xariga kursiga

- Qofku waa inuu ku fadhiistaa kursi leh suun.
- Ha u ogolaan ilmaha inay wadaagaan suun.
- Marna ha ogolaan in ilmo ku safro dhabtaada.

Boorsada hawada (Airbags)

Boorsada hawada waxaa loogu talagalay inay ka difaacdo dadka waaweyn shilka; waxayna ku socotaa 320km/saacadii markay ku dhacdo laabta qofka weyn.

Maraykana, boorsooyinka hawada ee rakaabka ayaa lala xiriiriyey dhimasho gaaraysa 21 qof oo ay ku jiraan lix cunug oo ku xirnaa kursi gadaal u sii jeeda oo ilmaha.

Kidsafe waxay soo jeedinaysaa in:

- Carruurta ka yar 12 sanadood aanay fadhiisan kursiga hore oo leh boorsooyinka hawada.
- In aan loo isticmaalin kursiga ilmaha kursiga rakaabka ee hore khaasatan marka boorsada hawadu ku rakiban tahay.
- Eeg gaariga tixraaciisa wixii macluumaada oo intaas ka badan oo boorsada hawada ee gaarigaaga.

Gaariga xamuulka qaada ama furan

Ma jiro qof loo ogol yahay inuu raaco gaariga xamuulka sida alaabta lagu qaado.
Alaabta daadsani waxay noqotaa mid khatar ah una shaqaysa sida gantaalka kuna socota socod ka badan 20 laab awoodooda.

- Qaybta dambe alaabta furfuran ee saaran muraayada ha ka hoosayso xata hadday yihiin sanduukhyada tiishiyuuga.
- Ku rakib gaariga wax kala celinaya xamuulka gadaala iyo meesha la fadhiistoo gaariga istayshan waaganka ah, hatchbacks, 4-Wheel drives iyo panel vans.

Haddii shil dhaco

Haddii kursiga ilmaha shil xumi ku dhacay qaabka guud oo kursiga wax gaareen. Kursigaas waa in la iska tuuraa xataa haddii aan wax ka muuqan.

U sheeg cidda gaariga kuu caymisay inta ilmood oo gaariga ku xiran si loo xaqiijiyo magdhowga.

Doorashada kursiga ilmaha

Markaad dooranayso kursiga ilmaha waxaad u baahan tahay inaad xaqiijiso in kursigu ku haboon yahay ilmaha, gaariga iyo baahida shakhsiga. Khaasatan, intay le'eg tahay meesha kursiga la dhigayaa (inta u dhexaysa suunka gaariga iyo suunka kursiga), iyo fogaanshaha u dhexeeya dhabarka kursiga hore iyo kan dambe (khaasatan kursiga ilmaha).

Kidsafe Western Australia

CHILD ACCIDENT PREVENTION FOUNDATION OF AUSTRALIA

fact sheet

Waxtarnimada kursiga gaariga ilmaha

Kursiga gaariga ilmaha si fiican loogu xiro, kuna haboon ilmaha da'diisa iyo miisaankiisa, waxay yarayn karaan dhaawaca khatarta ah ama dhimasho wadada ka dhacda ilaa 70 boqolkiiba.

Carruurta kursiga si fiican loogu xiro waxay u keenaan oo keliya dhaawac sahlan. Daraaso ay qabatay Wasaarada Caafimaadka ee WA waxay heshay in

- Boqolkiiba afartan (40%) carruurta isticmaasho kursi aan ku haboonayn baaxadooda iyo miisaankooda
- Carruurta ayaa lagu xiraa suumanka dadka waaweyn
- Suunka dhabtu kuma fila kursiga ilmaha

Sababta carruurtu khatar ugu jirto

Carruurta si khalad ah ama aan haboonayn loogu xiro kursiga waxay ku jiraan khatar aad u weyn marka shil gaari dhaco. Warbixintii Henderson (1994) waxay muujisay in si khalada ugu xirida gaarigu ay tahay arrin aad u weyn xagga carruurta khatartu ka soo gaarta shilka wadada.

Adeegyada Hubinta kursiga ilmuhu waxay ogaadeen:

- In 62% (189, 303dii xaalladoodba) kuraasta la hubiyey ay khalad ugu xirnaayeen. (Kidsafe WA, 1998)

69% (n=4,641) ee kuraasta leh cilad ku xiritaan (RACV 1996-1999)

Dhibaatooyinka ugu waaweyni waxay ahaayeen:

- Suumanka kursiga oo isku laaban ama khalad ah loo qaabeeyey
- Si khalad ah loogu xiray suunka, uuna aad u debecsanaa ama aanu ku habaysnayn dhererka garabka ilmaha
- Meesha ay iska xiran yihiin aan la samayn ama aan bartanka lagu xirin kursiga
- Cilad ka jirta meesha ay iska haystaan

Si khalad ah u rakibidu waxay kuu hogaamin kartaa khatar siyaada oo dhaawac iyo dhaawac khatara oo siyaada.

Waxaan haystaa kursi ilmood jira 10 sanadood:

Lagu talinmayo in ilmaha lagu xiro kuraasta ilmaha toban sano wixii ka dambeeya sababtoo ah:

- Kuraasta ka weyn toban sanadood lama ballan qaadi karo inay si fiican u shaqaynayaan sidii horayba loogu talagalay.
- Mustawaha Australia kor ayaa loo qaaday laga soo bilaabo 1991 waxaana la cusboonaysiiyey 1995, 2000 & 2004. Kuwii horena ma baahi tiri karaan naqshada cusub.

Kuraasta gacantii labaad ah

Waa sharci daro in la iibiyo wax kuraas ah oo waafaqsanayn AS 1754

Waxyaalaha la fiirinayo gacanta labaad:

- Mustawaha istiikarka Australia AS/NZS 1754
- Buugga awaamiirta
- Waxyaalla isu dhan
- Hubi taariikhda kursiga. Weydii qofka leh haddii gaari marna shil la galay.
- Eeg taariikhda lagu shaabadeeyey kursiga gadaashiisa. Ha isticmaalin haddii kursigu ka weyn yahay toban sanadood.
- Fiiri wax astaana oo muujinaysa in wax ku dhaceen. Waxay yeelanaysaa layn cad (layman la mid ah sida markaad isku laabto dhalada caanaha). Ha isticmaalin haddii ay jiraan layman badan, jajab, qalqalooc ama meel tuura yeellatay
- Ka eeg meelahay ka laabmaan ama iskaga xirmaan wax go'id ah ama dhamaad ah. Go'itaanka yar ama qalooc ka sii yar 5mm ayaa wuxuu muujin karaa gabowga suunka.
- Hubi isku laabmid ama isku murgid. Madow yari wuxuu muujin karaa in wax khariban yihiin.

Kursigee isticmaalayaa?

Dhamaan carruurta kuraastooda waxaa lagu tijaabiyaa xad mug ama culays ah, miisaanka iyo dhererka ayaana ah kuwa ugu muhiimsan marka go'aan laga gaarayo kan la isticmaalayo.

Ilmaha yar

- Dhalashada ilaa 9 kiilogaraam (kuraasta qaarkeed waxay ilmaha qaadaa 12kg)
- 700 mm dherer ahaan
- 6 bilood da' ahaan lehna xakamaynta madaxa

Isticmaal laba midkood

- Kaabsulka Amaanka Ilmaha (Baby Safety Capsule)
- Kursiga la bedeli karo oo gadaal u jeeda

Gurbood – Carruur yaryar

- Miisaankoodu dhan yahay 8kg – 18 kg
- Qiyaas ahaan 6 bilood ilaa 3/4 sanadood
- La siman garabka ama le'eg 2.5 cm oo ka koreeya halka xariga laga rakibo
- Heerka ishu waa inuu ka hooseeyaa kursiga gadaashiisa.

Kursiga ilmaha Gurboodka ah

Isticmaal labada midkood

- Kursiga la bedeli karo oo 0-4 sanadood
- Kursiga horay u jeeda oo gurboodka
- Kursiga isku jira (8kg ilaa 26kg)
- Sii wad isticmaalka kursiga ilmaha ilaa ilmuhu uu aad u dheeraado ama gaaro 18 kg.

Kursiga isku jira oo marba si loo isticmaalo

Da'da dugsiga ka horaysa iyo wixii ka weyn

- Miisaanka 14kg-26 kg
- Qiyaas ahaan 3-7 sanadood
- Isticmaal kor u qaadaha kursiga
- Kursiga gadaal kan kor loogu qaadayo, oo leh garbaha dhinacyada ah iyo suunka
- Dooro xoojiye leh qabatada lidka submarineka
- U isticmaal suunka amaanka leh xoojiye culayskiisu dhan yahay 26 kg. Xaqiiji in suunka dhabtu giigsan yahay dabadeedna rakib xariga.
- Ha isticmaalin suunka kursiga ama kushinka leh suunka kursiga ee dhabta keliya.

Kidsafe WA © 2007

Qayb ka mid ah waxaa laga yaabaa in koobi laga samaysan karo waxbarasho ahaan. Ogolaansho qoran ayaa loo baahan yahay xaashida dhamaanteed.

Intaas wixii ka badan ☎ (08) 9340 8509

Khadka Macluumaadka Amaanka Ilmaha ☎ 1800 802 244

www.kidsafewa.com.au

Daabacadaa xaashidaan waxaa taageeray iyagoo ku faraxsan:

SGIO

Britax Childcare First class travel for children